# Best Starts for Kids
## Oggolaanshaha Lacagta Kaalmada Daryeelka Carruurta

### QAYBTA 1: Warbixinta Ilmaha iyo Qoyska

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Magaca Waalidka #1**<br>(Ugu danbeeya, Koowaad) | | **Magaca Waalidka #2**<br>(Ugu danbeeya, Koowaad) | |
| **Magaca Ilmaha**<br>(Ugu danbeeya, Koowaad) | | **Taariikhda Dhalashada Ilmaha** | |
| **Aqoonsiga Kaalmada BSK ee Ilmaha** | | **Aqoonsiga CW e Ilmaha** | |
| **Aqoonsiga Kaalmada BSk ee Qoyska** | | | |
| **Kaalmada la Ogolaaday**<br>**Cadadka*:** Daryeelka carruurta ee Qoyska (FCC): $ | | Daryeelka lagu bixiyo Xarunta: $ | |
| **Cadadka Daryeelka la Ansixiyay:** | *Daryeelka Nus wakhtiga = 0-19 saacadood asbuucii* | *Daryeelka waqtiga buuxa = 20-50 saacadood asbuuc kasta* | *Daryeeka la dheereeyay = in ka badan 50 saacadood asbuucii* |

***Cadadka deeqda ilmaha da'da dugsiga ee dhigta barnaamijyada daryeelka ilmaha ee xarunta lagu bixiyo ayaa ah cadadka deeqda ugu badan.** Cadadka la bixinaayo kama badan doono qiimaha daryeelka ilmahaas. Cadadka daryeelka la ogolaaday (tusaale, nus wakhti, waqti buuxa, ama daryeelka la dheereeyay) ayaa sidoo kale la tixgelin doonaa marka go'aan laga gaaraayo cadadka kaalmada la siinaayo ilmaha gaaray da'da dugsiga. Cadadka kaalmada ee ilmaha da'da dugsiga gaaray ee dhigta barnaamijyada daryeelka ee qoyska ayaysan saamayn doonin cadadka lacagta dugsiga ee ay qaado FCC gaas.

Haddii wax kamid ah xogta kore u baahan tahay in wax laga badelo, fadlan nagala soo xiriir support@bskchildcare.org ama (206) 208-6865.

### QAYBTA 2: Xogta Daryeel Bixiyaha

| | |
|---|---|
| **Magaca Bixiyaha Daryeelka Carruurta/Magaca Barnaamijka** | |
| **Aqoonsiga Bixiyaha (MERIT)** | **Aqoonsiga CW ee Bixiyaha** |
| **Ciwaanka Wadada Barnaamijka**<br>(waxaa ku jira magaalada iyo lambarka boostada) | |
| Ciwaanka lacagta loo diraayo, haddii uu ka duwan yahay | |
| **Xiriirka Aasaasiga ah** | |
| **Lambarka Taleefanka** | **Ciwaanka Iimeelka** |
| **Xariirka Koowaad ee Biilka** | |
| Lambarka Taleefonka Xiiirka Qarash bixinta haddii uu Kaduwan yahay | Ciwaanka Iimeylka Xiriirka Qarash bixinta haddii uu Kaladuwan yahay |
| **Qiimaha Qarashka BISHII**<br>(qiimaha waxbarashada ee la shaaciyay taasoo laga qaadaayo ilmaha kor lagu sheegay) | |

## QAYBTA 3: Macluumaadka Lacagta Kaalmada ah

Hoos waxaad ka helaysaa jadwalka lacag bixinta ee ilmaha ku qoran Oggolaanshaha Lacag Bixinta.

***Cadadka lacagta ee daryeelka ilmaha gaaray da'da dugsiga ayaa ku kaladuwan sida loo xisaabshay ayadoo lagu saleynaayo nooca barnaamijyada daryeelka carruurta.**

- **Barnaamijyada lagu baxsho xarunta** cadadka kaalmada ayaa lagu saleeyaa kharashka daryeelka kamana badan karaan cadadka ugu badan ee cadadka Kaalmada ay ogoshahay Best Starts for Kids walaa qiimaha daryeelka. Cadadka kaalmada ee ilmaha da'da dugsiga ayaa ka yaraan doonta cadadka kaalmada loo ogol yahay ilmahaas ama qiimaha lacagta adeegga ee barnaamijku ku qaato cadadka daryeelka uu ilmuhu helay.
- **Barnaamijyada daryeelka Carruurta ee Qoyska (FCCs),** cadadka lacagta kaalmada ah ee ilmaha gaaray da'da dugsiga waa keliya uun cadadka ilmahaas la siinaayo (ayadoo lagu saleynaayo dakhliga qoyska, tirada qoyska, iyo cadadka daryeelka). Laguma saleynaayo lacagta adeegga ee FCC.

**Cadadyada ilmaha gaaraya da'da dugsiga, ee ilmaha loo ogolaaday daryeelka nus wakhtiga ah, ayaa lagu dabaqaa fasaxyada guud. Isbadellada lagu sameeyo daryeelka xiliga xagaaga ayaan ahayn kuwo ootomaatig ah. Qoysasku waa inay u sheegaan Barnaamijka Kaalmada ee Best Starts for Kids Isbadello kasta oo ku dhaca cadadka daryeelka loo baahan yahay ama bixiyaha daryeelka carruurta.**

****Cadadka kaalmada ayaa wax laga badelayaa bisha kadib dhalashada koobaad ee ilmaha; bisha ka danbaysa marka ilmuhu gaaro 2.5 sano; ilmaha jira 5 sano marka ay galaan dugsiga; iyo ilmaha jira 6 sano ee aam wali gaarin da'da dugsiga, bisha ka danbaysa dhalashadooda 6aad.**

*****Ilmaha ayaan hadda kadib u qalmin Kaalmada Best Starts for Kids marka ay gaaraan 13 sano jir. Kaalmada Best Starts for Kids ayaa la siin doonaa bisha ilmuhu gaaro da'da 13aad. Tan ayaa noqon doonta bisha ugu danbaysa ee Kaalmada Best Starts for Kids ee ilmahaas.**

Barnaamijka Kaalmada Best Starts for Kids, Degmada King, iyo BrightSpark ayaa xaq u leh inay wax ka badesho cadadkaan. Sababaha isbadelka waxaa ku jira isticmaalka caadiga ah ee heer ka yar cadadka la ansixiyay (tusaale ahaan, nus waqti, wakhti buuxa, daryeel la dheereeyay), cilado ku jira bayaanka xisaabta, ama isbadelka adeeg bixiyaha / nooca barnaamijka. Sababaha joojinta lacagaha Kaalmada Best Starts for Kids waxaa ku jira laakiin kuma koobneyn in qoysku u guuro meel ka baxsan Degmada King, in aysan kasoo qaybgelin wakhtiga mudada la kordhiyay, ama in barnaamijku lumiyo ruqsadda shaqada.

| **LAGA BILAABO** Taariikhda | **ILAA** Taariikhda | Qaybta Da'da Ilmaha | Cadadka Daryeelka | Nooca Daryeel Bixiyaha | Cadadka Deeqda | Qoraalada |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | |
| | | | | | | |
| | | | | | | |
| | | | | | | |
| | | | | | | |
| | | | | | | |
| | | | | | | |
| | | | | | | |
| | | | | | | |
| | | | | | | |

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | |

## QAYBTA 4: Muddooyinka Ogolaanshaha

**Gaar u ah Heshiiskaan Ogolaanshaha:**

| Muddada Ogolaanshaha | |
|---|---|
| Taariikhda Biloowga: | Taariikhda Dhammaadka: |

Tani waa muddada HEShIISKAAN uu sii shaqeynaayo. Tan ayaa ka yaraan karta muddada buuxda ee ogolaanshaha ilmaha/qoyska. Heshiiskaan ayaa noqon kara mid muddo kooban, sida daryeelka xagaaga keliya, ama muddo dheer.

**Ogolaanshaa Qoyska:**

| Muddada Ogolaanshaha | |
|---|---|
| Taariikhda Biloowga: | Taariikhda Dhammaadka: |

Oggolaanshiyaasha waxaa lagu saleeyaa qoyska, laguma saleeyo ilmo gaar ah. Hase yeeshee, ogolaanshiyaasha waxaa keliya ku jira ilmaha gaarka ah ee ku jira ogolaanshaha uu bixiyay Barnaamijka Kaalmada ee Best Starts for Kids.

## QAYBTA 5: Sixitaannad iyo Xogaha Cusub

Xogtaan ayaa loo dirayaa labadaba qoyska ilmaha iyo daryeel bixiyaha liiska ku jira. Qoysaska iyo bixiyaasha ayaa laga codsanayaa inay soo diraan xogaha cusub haddii xogta ku jira ay khaldan tahay ama u baahan tahay cusbooneysiin.
Fadlan la xiriir Barnaamijka Caawimaada Daryeelka Carruurta ee Best Starts for Kids:

Daryeel bixiyaasha: Providers@BSKchildcare.org ama (206) 339-5570
Qoysaska: Support@BSKchildcare.org ama (206) 208-6865
Qoysaska ayaa si toos ah u codsan kara wax ka badelka cadadka daryeelka la ogolaaday.

## QAYBTA 6: Shuruudaha iyo Xeerarka Bixiyaha daryeelka caruurta

**Shuruudaha Lacag Bixinta:** Cadadka kaalmada ee kor lagu faahfaahshay ayaa toos loo siin doonaa bixiyaha daryeelka caruurta asagoo wakiil ka ah ilmaha magaciisa la sheegay. Haddii Kaalmada Best Starts for Kids aysan daboolayn qiimaha buuxa ee daryeelka ilmaha, daryeel bixiyaha ayaa ka qaadi kara waalidka ama masuulka baaqiga soo haray.

1. Waa masuuliyada waalidka inuu la gorgortamo uuna bixiyo dhammaan qarashaadka/lacagaha aan lagu daboolayn Kaalmada Best Starts for Kids.
2. Bixin la'aanta qarashaadka ayaa keeni kara joojinta kaalmada ilmaha. Taariikhaha loo cayimay qarashaadka waxaa ka heshiinaaya waalidka/masuulka iyo daryeel bixiyaha ilmahooda.
3. Kaalmada Best Starts for Kids ayaan dhiibayn kharashaadka soo socda: Qarashaadka wakhtigoodii la dhaafay, qarashaadka safarada gaaban, qarashka diiwaan gelinta, maalmaha/saacadaha dheeriga ah ee aan la ogolaan.
4. Maalmaha wakhtiga buuxa ayaa loo ogolaan doonaa ilmaha da'da dugsiga inta lagu jiro fasaxyada dugsiga, sida waafaqsan jadwalka lacag bixinta dugsiga oo uu dejiyay Barnaamijka Kaalmada Best Starts for Kids. Lacagta daryeelka wakhtiga buuxa ee xagaaga waa inuu codsadaa, qoysku, uuna ansixiyaa Barnaamijka Kaalmada ee Best Starts for Kids.
5. Bixiyaasha (iyo qoysaka) ayaa laga doonayaa inay nagu soo wargeliyaan haddii ilmaha loo ogolaado ama uu adeegsanaayo barnaamijyo kale ee oo kaalmo, sida taageerooyinka daryeelka Carruurta ee Working Connections (WCCC) ama kaalmooyiinka gobalka. Inta badan, adeegsiga WCCC ayaa keenaysa inaan loo qalmin lacagaha Kaalmada Best Starts for Kids.

**Xeerka Xaadirista:** Bixiyaha ayaa la siin doonaa cadadka la ogolaaday haddii ilmuhu xaadiro ugu yaraan hal (1) maalin inta lagu jiro bisha la ogolaaday uuna diiwaan gashan yahay bisha buuxda.

1. Maqnaanshiyaasha soo noqnoqda ee xad dhaafka ah ayaa sabab u ah dib u eegista saacadaha daryeelka la ogolaaday waxayna keeni karaan hoos u dhigista saacadaha ama joojinta kaalmada ilmaha.
2. Waalidka/masuulka iyo bixiyaha ayaa dejinaaya jadwalka ilmaha. Waalidka/masuulku waa inuu raacaa xeerka xaadirista ee uu kula heshiiyay bixiyaha marka ilmuhu isdiiwaan gasho.
3. Bixiyaasha ayaa masuul ka ah inay u soo sheegaan Adeegyada Waxbarashada Dhallaanka ee BrightSpark, maamulaha kaalmada Best Starts for Kids, marka xaadirista ilmaha isbadel wayn ku dhaco. Fadlan nala soo xiriir labo asbuuc gudahood marka isbadelku dhaco adoo wacaaya (206) 339-5570 ama providers@bskchildcare.org.
4. Haddii ilmuhu uusan soo xaadirin labo (2) billood oo xiriir ah, kaalmada ayaa la xiri doonaa, bixiyaha ayaanna heli doonin lacago danbe. Lacagta ayaan la bixin doonin bilaha aan barnaamijka la xaadirin. Fadlan sidoo kale tix raac xeerarka "hakinta" barnaamijka.

**Qaabka Lacag Bixinta iyo Jadwalka:** Lacagaha Kaalmada ah ee Best Starts for Kids waxaa lagu bixiyaa lacag shubis toos ah.

1. Bixiyaasha aan horey u haysan heshiiska lacag bixinta tooska ah oo ay kula jireen BrightSpark ayaa noo diri doonaa nuqulka galka heshiiska "adeeg bixiyaha cusub" si ay u buuxshaan. Ma jirto lacag la bixin karo ayadoo aysan marka hore helin BrightSpark nuqulka foomka W-9, ruqsada daryeelka Carruurta ee DCYF, iyo xogta baanka ee barnaamijka. BrightSpark ayaa u sheegi doonta bixiyaasha haddii nuqullada agabkaan aysan ku jirin diiwaankeeda.
2. Bixiyaasha xaaladahoodu qasab ka dhigaan inay helaan jeega warqadda ah waa inay u sheegaan BrightSpark ayna codsadaan qaab kale oo lacagta lagu siiyo. BrightSpark, oo ah Maamulaha Kaalmada Best Starts for Kids, masuul kama ahan lacagaha ku luma boostada, xatooyada boostada, ama ciladaha kale ee dhacaaya kadib marka lacagta lagu diro boostada. Fadlan nagala soo xiriir lambarka (206) 339-5570 ama providers@bskchildcare.org iHaddii aadan lacagta boostada laguugu soo diray helin. Waxaan xaq u leenahay inaan codsano xogtaada baanka aanna lacag kasta oo mustaqbalka kuugu soo dirno lacag dirista tooska ah.
3. Lacagaha loo diro daryeel bixiyaasha waxaa caadiyan ku jiraaya lacagaha Kaalmada Best Starts for Kids ee dhammaan ilmaha ka diiwaan gashan Barnaamijka Kaalmada ee Best Starts for Kids.
4. Kaalmada Best Starts for Kids waa in loo adeegsadaa bixinta daryeelka carruurta ee ay bixisay Xarunta daryeelka Carruurta (CCC) ama Daryeelka carruurta ee Qoyska (FCC) kuwaasoo ruqsad ka haysta DCFY sumcadna ku leh Gobalka Washington. Daryeel bixiyaasha qoyska, saaxiibka, iyo dariska ayaan u qalmin.

## QAYBTA 7: Shuruudaha iyo Qarashaadka Qoysaska

**Qarashaadka iyo Lacagaha:** Kaalmada Best Starts for Kids ayaan daboooli karin qarash buuxa ee daryeelka ilmahaaga. Waxaad lahaan kartaa "qaybta waalidka/masuulka" iyo/ama qarashaadka dheeriga ah oo ay qasab tahay in aad
toos u siiso bixiyaha daryeelka ilmaha.

- Waa masuuliyad ku saasan in aad la gorgortanto aadna bixiso dhammaan qarashaadka/lacagaha aan lagu daboolayn Kaalmada Best Starts for Kids.
- Bixin la'aanta kharashaadka ayaa keeni kara joojinta kaalmadaada. Taariikhaha loo cayimay

qarashaadka waxaa ku heshiinaaya waalidka/masuulka iyo daryeel bixiyaha ilmahooda.

- Kaalmada Best Starts for Kids ayaan bixin doonin qarashaadka dheeriga ah, ayna ku jiraan qarashaadka lala soo daaho, qarashaadka safarada gaaban, qarashaadka diiwaan gelinta, iyo maalmaha/saacadaha dheeraadka ah ee aan lagu ogolaan kaalmadaada.
- Maalmaha wakhtiga buuxa ayaa loo ogoaan doonaa ilmaha da'da dugsiga xiliyada fasaxa dugsiga, sida ku cad jadwalka qeexaaya wakhtiyadaan. Qoysaska doonaaya daryeelka wakhtiga buuxa ee xagaaga ee ilmaha da'da dugsiga waa inay si gaar ah u codsadaan isbadelkaan ayagoo la xiriiraaya Barnaamijka Kalamada ee Best Starts for Kids.

**Maqnaanshiyaasha:** Ilmahaaga ayaa u baahan inuu xaadiro ugu yaraan hal (1) maalin inta lagu jiro bisha si bixiyahaaga loo siiyo lacagta bishaas loo ogolaaday. Bilaha marka ilmuhu uusan ka diiwaan gashanayn bil buuxda barnaamij gaar ah oo daryeelka ilmaha ah, waxaa lagu qiimeyn doonaa maalmaha uu xaadiray badelkii si buuxda loo bixin lahaa.

- Maqnaanshiyaasha soo noqnoqda ee xad dhaafka ah ayaa sabab u ah dib u eegista saacadaha daryeelka la ogolaaday waxayna keeni karaan hoos u dhigista saacadaha ama joojinta kaalmadaada.
- Waxaad la dejinayaa jadwalka ilmahaaga daryeel bixiyaha waana inaad raacdaa xeerka xaadirista ee aad kula heshiisay bixiyaha; marka ilmaha la diiwaan geliyo.
- Haddii ilmahaagu uusan xaadirin labo (2) bilood oo xiriir ah, kaalmada ayaa la xiri doonaa, bixiyaha ayaanna heli doonin lacago danbe. Lacagaha ayaa la siin doonaa bixiyaha bilaha ilmahaagu uusan xaadirin barnaamijka. (Fadlan sidoo kale arag siyaasada "hakinta".)

**Ogolaanshaha:** U qalmida iyo cadadka kaalmada ayaa lagu saleyn doonaa ciwaanka, dakhliga qoyska, tirada qoyska, da'da llmaha, nooca daryeelka, iyo baahiyaha daryeelka ilmaha ee uu sheegay waalidka/masuulku.

- Marka la ogolaado, lagaama doonaayo inaad soo sheegto isbadellada ku dhacaaya tirada qoyska ama dakhliga qoyska ilaa laga gaaraayo wakhtiga xiga ee ogolaanshaha. Qoysaska ayaa laga doonayaa inay soo sheegaan isbadellada ku dhaca guriga iyo nooca daryeelka.
- Isbadellada kordhin kara cadadkaaga kaalmada (tusaale, hoos u dhaca dakhliga, xubin cusub oo qoyska ku soo biiray) ayaa lasoo sheegi karaa inta lagu jiro wakhtiga oggolaansho bixinta.
- Haddii aad soo sheegto isbadel ku dhacay tirada qoyskaaga ama dakhliga kuwaasoo kaa dhigaaya mid u qalma Working Connections (WCCC), waxaa lagaa codsan doonaa inaad codsato WCCC waxaana la joojin doonaa kaalmadaada Best Starts for Kids 2 bilood gudahood marka aan kuu soo dirno ogeysiiska, ilaa inaad noosoo dirto maahee, nuqulka warqadaada diidmada WCCC mudadaas gudaheed. Qoysaska iyo bixiyaasha ayaa laga doonayaa inay noosoo sheegaan haddii kaalmadooda WCCC la ogolaado. Inta badan kiisaska, diiwaan gelinta Barnaamijka kaalmada Best Starts for Kids ayaa joogsan doonta marka la adeegsado kaalmada WCCC.

**Isbadellada:** Waxaa jiri kara marxallado lacagta lagu siinaayo hoos loo dhigaayo.

- Daryeelka ilmaha da'da dugsiga gaaray ee lagu bixiyo barnaamijka xarunta leh, cadadka kaalmada la bixinaayo ayaa marna ka badan doonin qiimaha la shaaciyay ee bixiyaha. Ilmaha yaryar, ayadoo aan loo eegayn nooca barnaamijka, ama ilmaha da'da dugsiga ee dhiganaaya barnaamijka daryeelka ilmaha ee qoyska (FCC), cadadka kaalmada Best Starts ayaa ka badan kara lacagta qiimaha u degsan barnaamijka e ilmaha da'daas iyo cadadka daryeelka la adeegsaday.
- Haddii bixiyaha ay u degsan tahay wakhtiga xiritaanka qorsheysan, cadadka kaalmada ayaa la yareyn karaa maalin kasta oo la qorsheeyay xiritaan, ayadoo lagu saleynaayo jadwalka daryeelka ilmaha.

**Isbadellada:** Fadlan na sii ogeysiiska isbadellada saacadaha daryeelka ilmaha ee loo baahnaa, xaaladaha qoyska ama xogta xiriirka sida ugu dhakhsaha badan adoo u diraaya Kooxda Taageerada Helitaanka Qoyska ee Best Starts for Kids adoo wacaaya ama fariin qoraal u diraaya
(206) 208-6865 ama iimeylka support@bskchildcare.org.

- Ogeysiiska xili hore ayaa naga caawin doona xaqiijinta inaysan jirin dib u dhac ku yimid lacag loo diraayo daryeel bixiyahaaga.

**Badelida Bixiyaasha:** Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Carruurta ee Best Starts for Kids waa in la siiyaa ogeysiiska hore ugu yaraan labo (2) asbuuc si loo xaqiijiyo kala guurka fudud ee kaalmada.

- Waa masuuliyada waalidka/masuulka inuu soo sheego isbadelada dhaca bixiyaha daryeelka ilmahaaga iyo Kooxda Best Starts for Kids Subsidy.
- Kaalmada Best Starts for Kids ayaa ka doonaysa waalidka/masuulka inuu raaco tilmaamaha bixiyaha ee la cadeeyay laguna heshiiyay marka uu bixinaayo ogeysiiska. Kuwaan ayaa kala duwanaan kara shardiga labada asbuuc ah ee Barnaamijka Kaalmada ee Best Starts for Kids.
- Marka ogeysiiska ugu yaraan labada asbuuc kahor ee isbadelka bixiyaha loo diro Kooxda Kaalmada ee Best Starts for Kids Subsidy iyo daryeel bixiyaha hadda, Barnaamijka Kaalmada ee Best Starts for Kids Subsidy ayaa siinaaya daryeel bixiyahaas qarashka mudada labada asbuuc ee ogeysiiska ah (laga bilaabo taariikhda ogeysiiska loo diray Kooxda Kaalmada ee Best Starts for Kids Subsidy), marba haddii labada asbuuc ku dhex jirto bisha ilmuhu xaadiraayay barnaamijka. Ma jirto lacag la siin doono daryeel bixiye, bilaha ama qaybaha bisha, ee ilmuhu uusan dhiganayn barnaamijkaas daryeelka ee gaarka ah.
- Ku fashilmida siinta ogeysiiska loo baahan yahay bixiyaha ayaa keeni karta in qoysku masuul ka noqdo dhiibista qarashaad kasta sida ku cad xeerarka bixiyaha.
- Hadii aad badelayso bixiyaasha, dhammaan qarashaadka bixiyahaaga hadda waa in si buuxda loo shubaa, ama qorshe lacag bixin la dejiyaa aadna sumcad leedahay kahor inta aan wareejinta kaalmada lagu heshiiska. Baqiyad uu kugu leeyahay bixiye ayaa saamayn kara u qalmida qoyska ee u wareegida daryeel bixiye cusub.
- Haddii aad ku nagaanayso isla daryeel bixiyaha laakiin aad adeegsan doonto goob/xarun kale (muddo gaaban ama muddo dheer), u sheeg isbadelkaan Kooxda Kaalmada ee Best Starts for Kids Subsidy ugu yaraan labo asbuuc kahor. Isbadelaan ayaa saamayn kara cadadka lacagta la bixinaayo. Tusaale: *ka wareegida Daryeelka Carruurta ee ABC oo ku yaala goobta Tree aadna u wareegto Daryeelka Carruurta ee ABC oo ku yaala goobta Ocean ayaa u baahan in aad noosoo sheegto.*

**Jadwalka Kaalmada:** Oggolaanshahaaga Kaalmada Best Starts for Kids ayaa keliya shaqeynaysa laga bilaabo taariikhda biloowga ilaa taariikhda dhammaadka ee ku qoran Heshiiska Ogolaanshaha Kaalmada.

- Ogeysiiska dib u xaqiijinta ayaa loogu diri doonaa qoysaska iimeylka ugu yaraan lix asbuuc kahor taariikhda dhammaadka kaalmadaada. Haddii aad u baahan tahay in dukumiintiga lagu soo diro boostada, codsiga rasmiga ah waa in loo diraa Kooxda FAS.
- Agabka dib u xaqiijinta waa in lagu soo celiyaa mudada ay u cayimeen Kooxda FAS. Haddii aad u baahan tahay taageero ku aadan hawsha dib u xaqiijinta, waxaan kugu xiri karnaa xubin kamid ah Kooxda FAS.
- Ku fashilmida soo gudbinta dukumiintiyada dib u xaqiijinta wakhtiga loo cayimay ayaa keeni karta carqalad, ama joojinta kaalmadaada daryeelka ilmaha.
- Si loo kordhiyo Oggolaanshahaaga Kaalmada Best Starts for Kids, u qalmida Kaalmada Best Starts for

Kids waa in la xaqiijiyaa inta lagu jiro dib u xaqiijinta.

**Joojinta Kaalmada:** Kaalmaaada Best Starts for Kids ayaa la joojin karaa sababaha soo socda awgood:

- Been abuurka xogta, ayna ku jiraan in aadan keenin dhammaan xogta loo baahan yahay si loo go'aansho u qalmidaada, bixinta xog been abuur ah, ama been abuurka dukumiintiyada.
- Isbadelka ku dhaca dakhliga, tirada qoyska ama ciwaanka taasoo keenaysa u qalmida qoyska ee barnaamij kale oo kaalmo (tusaale, Daryeelka Carruurta ee Working Connections).
- Ku fashilmida raacida habraacyada barnaamijka, ayna ku jirto in shaqaalaha loo sheego isbadelada, soo celinta dukumiintiyada dib u xaqiijinta, iwm.
- Bixin la'aanta qarashaadka bixiyaha daryeelka ilmaha, ku fashilmida dejinta qorshaha bixinta qarashaadka lagugu leeyahay, ama in aadan si fiican u raacin qorshaha lacag bixinta.

Kaalmada Daryeelka Carruurta ee Best Starts for Kids ayaa keliya bixinaysa qarashaadka kaalmaatiga daryeelka carruurta ee guriga (Barnaamijka Daryeelka Carruurta ee Qoyska) iyo xarumaha ruqsada ka haysta Waaxda Carruurta, Dhalinta, iyo Qoysaska (Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF). Kaalmada Daryeelka Carruurta ee Best Starts for Kids ma siiso ruqsad, ma taageerto, ama kuma talinayso daryeel bixiye gaar ah. Ma xaqiijin karno in daryeel bixiye uu baxsho daryeelka carruurta oo tayo leh. Si loo daboolo baahiyaha daryeelka carruurta ee qoysaska, Kooxda Taageerada iyo Helitaanka Qoyska (FAS) ayaa qoysaska ku xiri karta xarumaha ama guryaha daryeelka carruurta ee qandaraaska ku jira; hase yeeshee, dookha kama danbaysta ah ee daryeel bixiyaasha ilmaha waa masuuliyada keliya waalidka/masuulka.

Waalidka/masuulka waxaa lagu boorinayaa inay si taxadar leh u wareystaan ayna hubiyaan tixraacyada kahor inta aysan ilmahooda gelin daryeelka bixiyaha. Si aad dib ugu eegto taariikhda ruqsad bixinta DCYF ee bixiyaha daryeelka carruurta inta lagu jiro cabashooyin kasta, waxaad buuxin kartaa raadinta bixiyaha oo aad ka helayso: [https://findchildcarewa.org/](https://findchildcarewa.org/).

## QAYBTA 8: Xeerarka Lacag bixinta khaldan iyo tan Xad Dhaafka ah

### Lacagaha Khaldan

Kuwaan ayaa noqon kara marxalladaha lacagta loo diray bixiyaha khaldan, lacagta cadadka khaldan la bixiyay, ama bixiyaha lacagta lagu siiyay qoys ama bixiye aan u qalmin lacagta. Xaaladaha soo socda ayaa hoos lagu qeexay.

### Cadadka lacagta kaalmada ah oo khaldan

Haddii lacagta kaalmada oo aan ku filnayn la siiyo bixiyaha daryeelka ilmaha, qoraal ayaa la raacin doonaa arinta gaarka ah iyo bisha lacagta, waxaana la bixin doonaa lacagta saxda ah. Haddii lacagta kaalmada oo dheeri ah la siiyo bixiyaha daryeelka ilmaha, qoraal ayaa la raacin doonaa arinta gaarka ah iyo bisha lacagta. Haddii ilmuhu sii wadaayo daryeelka, cadadka dheeriga ah ayaa laga jarayaa kaalmada bisha xigta. Haddii aan ilmuhu sii wadayn daryeelka, bixiyaha daryeelka ilmaha ayaa laga codsan doonaa inuu soo cesho baaqiga.

### Labo jeer bixinta dheefaha

Labo jeer bixinta dheefaha ayaa dhacda marka bixiyaha daryeelka caruurta la siiyo lacagta wax ka badan halmar isku daryeelka la baxshay ama bixiyaha daryeelka ilmuhu lacag ka helo WCCC (ama kaalmo kale) iyo kaalmada Daryeelka Carruurta ee Best Starts for Kids iskumar. Labada marba, codsiga dib u celinta lacagta ayaa loo diri doonaa bixiyaha daryeelka carruurta.

### Lacagta la siiyay bixiyaha khaldan

Haddii lacagta loo diro daryeel bixiye khaldan, qoraal ayaa la raacin doonaa arinta gaarka ah iyo bisha lacagta. Haddii daryeel bixiyuhu hayo ilmo daryeelka sii wadanaaya, cadadka dheeriga ah ayaa laga jarayaa kaalmada bisha xigta ee ilmo kale. Haddii aysan jirin ilmo sii wadanaaya daryeelka daryeel bixiyahaas, bixiyaha daryeelka caruurta ayaa laga codsan doonaa inuu soo celiyo lacagta ku khaldantay.

### Lacagta la siiyay qoyska ama bixiyaha aan u qalmin

Haddii lacagta lagu baxshay qoys aan u qalmin ama la siiyo bixiye aan hadda kadib u qalmin, codsiga dib u bixinta ayaa loo diri doonaa bixiyaha daryeelka carruurta.

### Been abuurka kaska ah ee lacagta

Haddii la go'aansho in qoys ama bixiye uu iskudayay inuu barnaamijka khiyaano asagoo xog been abuur ah oo kas ah siyay, gudiga dib u eegista ayaa qiimeyn doona xaqiiqooyinka iyo marxalladaha xaallada kuna talin doona tallaabooyinka xiga. Gudiga dib u eegista waxaa ku jiri doona ugu yaraan hal wakiil oo ka socda Degmada King, BrightSpark, iyo kooxda FAS.

### Cabashooyinka/Racfaannada/Diidmooyinka

Qoyska ama bixiyaha ka shakiya khlaad ku jira dib u eegista, go'aaminta u qalmida, ama xisaabinta cadadka kaalmada ayaa awooda inuu soo gudbiyo codsiga dib u eegista. Qoysaska ayaa codsan kara dib u eegista qayb kamid ah hawsha asagoo ugu soo gudbinaaya maamulaha kiiska Kooxda FAS taleefanka, iimeylka, ama fariin qoraal. Codsiga racfaan kasta ayaa bilaabaaya dib u eegis buuxda ee xaalada markaas ee qoyska. Haddii sixitaan la go'aansho in loo baahan yahay, isbadel ayaa loo gudbin doonaa xubinta Kooxda FAS ee hawsha maamulaaya si uu ugu sheego qoyska.

Haddii qoys uu helo warqdda diidmada uuna su'aao qabo ama doonaayo inuu codsado dib u eegis, Kooxda FAS ayaa tigidh u gudbin karta Kooxda Hogaanka Best Starts si codsiga qaab sax ah looga shaqeeyo. Bixiyaasha ayaa codsan kara dib u eegis ay ku soo gudbinayaa taleefanka bixiyaha ee Kaalmada Best Starts ama ciwaanka providers@bskchildcare.org. Kooxda Biilasha ee Kaalmada Best Starts ayaa codsiga ka shaqeyn doonta. Haddii sixitaan la go'aansho in loo baahan yahay, isbadel ayaa loo gudbin doonaa xubinta Kooxda FAS ee hawsha maamulaaya si uu ugu sheego qoyska iyo si toos ah bixiyaha, go'aannada deeqda ayaana la badeli doonaa.

## QAYBTA 9: Heshiiska Qoyska ee

## Saxiixyada Ogolaanshaha

Waxaan ahay waalidka ama masuulka ilmaha magaciisa kor lagu sheegay waxaana doonayaa inaan helo kaalmada Lacagta Daryeelka carruurta ee Best Starts for Kids si loogu daboolo lacagta dugsiga cunugayga ee barnaamijka daryeelka carruurta ee kor lagu sheegay.

Waan fahmayaa in lacagta loo diri doono bixiyaha daryeelka carruurta ee kor ku qoran aana masuul ka ahay qarashka waxbarashada ama dugsiga ee aan lagu daboolayn deeqda Kaalmada Best Starts for Kids.

☐ ISi taxadar leh ayaan u akhriyay una aqbalay shuruudaha iyo xeerarka lagu sheegay Heshiiska Oggolaanshaha Kaalmada.

Magaca Farta waawayn ee Waalidka/Masuulka | Taariikhda

Saxiixa Waalidka/Masuulka

**Heshiiska Bixiyaha**

Waxaan hadda haystaa ogolaanshaha diiwaan gelinta carruurta. Waxaan ka diiwana gashay cunuga magaciisu kor ku yaalo barnaamijkayga waxaana aqbalayaa inaan aqbalo lacagta ay bixiso kaalmada Best Starts for Kids. Haddii la iga codsado, waxaan qirayaa inaan keeni doono cadaynta adeegyada aan codsanaayo qarashkooda anoo ku muujinaaya foomamka xaadirinta. Waxaan fahmayaa cadadka ugu badan ee lacagta inay isbadali karto ayadoo ku xiran xaadirista iyo diiwaan gelinta.

☐ Si taxadar leh ayaan u akhriyay una aqbalay shuruudaha iyo xeerarka lagu sheegay Heshiiska Oggolaanshaha Kaalmada.

Magaca Barnaamijka | Aqoonsiga Bixiyaha MERIT

Magaca Bixiyaha/Xiriirka Rasmiga ah, oo Far waawayn ku qoran | Taariikhda

Saxiixa Xubinta